

Waxa Ay Tahay Inaad Ka Ogaato Baaritaanka COVID-19

Ogow astaamaha



Astaamaha ugu waaweyn ee COVID-19 waa:

- Qufac
- Qandho
- Neef-qabasho

Ogow marka la raadsado caawimaad



Ma aha qof kasta oo jiran inay tahay in la baaro.

Waaxdaada [caafimaadka ee dowladda hoose](#) ama dayeel-bixiyaha caafimaadkaaga ayaa ku caawin kara:

- Go'aanso haddii aad u baahan tahay ballan, iyo
- Qorsheyso inaad u gasho xarun caafimaad qaab looga fogaado inay suurogal noqoto inaad dad kale qaadsiiso, haddii aad gudaha gasho.

Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah, garaac 911.

Ogow su'aalaha daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga ku weydiin karo



- ? Waa maxay astaamahaaga?
- ? Miyaad u safartay goobo uu ka jiro COVID-19?
- ? Ma is taabateen qof socdaal ku tagay halka uu ka jiro COVID-19?
- ? Miyaad is taabateen qof qaba kiis la xaqiijiyay ee COVID-19?

Caymiska daryeelka caafimaadka ee baaritaanka COVID-19

Caymiska daryeelka caafimaadkaaga waxaa laga yaabaa inuu daboolo kharashka:


- Baaritaanka COVID-19 ee adeeg-bixiyaha, xarunta daryeelka degdega ah ama qolka gargaarka degdegga ah ee qeybta ka ah
- Tallaalka COVID-19 markuu diyaar noqdo.

Ka baxsan baaritaanka COVID-19, kharashka joogtada ah, sida horumariska, caymis-wadaaga iyo lacagta caymiska laga jaro wali way jirayaan. Had iyo jeer way fiican tahay inaad raacdo qorshahaaga si aad wax uga ogaatid kharashkaaga.

Ogow waxa dhici doona haddii aad rabto in lagaa baaro COVID-19

Daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga ayaa la shaqeyn doona [waaxda caafimaadka dowlada hoosesi](#) loo ogaado in aad u baahan tahay inaad iska baarto COVID-19.


Daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga ayaa qaadi doona muunado



Daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga wuxuu:

- Suuf gelin doonaa gudaha sankaaga
- Suuf gelin doonaa gudaha dhuuntaada
- Qaadi doonaa muunad candhuuftaada ah oo xaako leh, haddii aad qufacayso xaako.

Ogaan doonaa waxa lagu sameeyo muunadaha baaritaanka



Daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga ayaa:

- Qaadi doona muunado oo kaala hadli doona tallaabooyinka xiga
- U diri doona muunadahaaga Sheybaarka Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka Oregon (OSPHL) ama sheybaar u idman baaritaanka.

Sheybaarka wuxuu:

- Baari doonaa COVID-19
- Siin doonaa daryeel-bixiyaha caafimaadkaaga iyo waaxda caafimaadka dowlada hoose natiijoyinka.

Hadduu baaritaankaagu muujiyo inaad qabto COVID-19:

- Dhakhtarkaaga ayaa go'aansan doona inaad aad u jirran tahay oo u baahan tahay isbitaal
- Waaxda caafimaadka dadweynaha ee dowlada hoose ayaa kula soo xiriiri doonta
- Waxaa laguu sheegi doonaa inaad ku nagaatid guriga in muddo ah.

Si aad wax badan u ogaato, booqo healthoregon.org/coronavirus ama wac 211.

WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Waxaad ku heli kartaa dokumentigan luuqado kale, far waawayn, farta indhoolaha ama qaabka aad doorbidayso. Kala xiriir Qeybta Caafimaadka Dadweynaha lambarka 971-673-0977 ama 971-673-0372. Waannu qabanaa dhammaan wicitaanada gudbinta ama waxaad wici kartaa 711.

Oregon
Health
Authority